



Haddii Canada dhexdeeda Dembi lagugu qaado iyo sida eey wax ugu geeyan karto sharcigaaga

Haddii Canada dhexdeeda dambi lagaaga soo oogay, waxaad xaq u leedahay in kiiskaaga lagu dhegeysto maxkamadda dembiyada. Marka maxkamaddaada la qaadayo, Garyaqaan dowladda ka socda ayaa isku dayidoona in u dambiga kuugu caddeeyo si macquul ahaan aan innaba shaki ugu jirin, haddii aay caddeeyn kari waayaan, waxaa markaas la go'aamindoona in aadan dambiga galin.

Waa inaad taqaan nooca xaaladda socdaal (immigration status) oo aad ku sugan tahay. Haddii aadan ahayn muwaadan Canadian, go'aanka ay maxkamaddu gaarto waxuu saameyn ku yeelan karaa xaaladaada socdaal. Waxuu waaxda socdaalka (immigration authorities) u horseedi karaa in ay qaadaan tilaabooyin adiga lid kugu ah ee lagugu tarxiili karo (removal order). Kaasi waa amar lagaaga eryaayo Canada oo lagu dhoofinayo dal kale.

Waa kuwaan tusaalooyin dhoowr ah ee dambiyada saameeyn ku yeelan kara xaaladaada socdaal — baabuur aad wadid adigoo sarqaansan, xatooyo aad xadid xataa sheey qiimahiisu yar yahay, haddii aad weerartid qooyaskaaga ama dad kale, haddii lagugu helo maskax-dooriyal mamnuuc ah.

Maxaan Sameeyaa haddii dambi la igu soo oogo?

Waxaad u baahan tahay intaadan kiiska wax tilaaba ah ka qadin la-talin sharciyeed oo la xiriirta sharciyada dambiga iyo socdaalka (criminal and immigration law) labadaba. Haddii aadan iska bixin karin, waxaad la-talin sharciyeed ka heli kartaa hey'adda Ontario ee dadka ka caawinta xagga Sharciga (Legal Aid Ontario).

Sida ugu dhaqsi badan u raadso garyaqaan. U sheeg garyaqaankaaga in aad ka walwalsan tahay saameeynta go'aanka maxkamaddu u ku yeelan doono xaaladaada deganaansho ee Canada.

Maxaa xaaladeeyda ku imaan kara?

Haddii aadan ahayn muwaadan Canadian ah, dambiyada qaarkood waxey kuu keeni karan in aad lumiso xaaladaada deganaansho. Wax tixgelin ah yeelan meeyso intii sano oo aad halkaan ku nooleeyd. Waaxda socdaalku waxey kaa qaadan karaan tilaabooyin lid kuugu ah oo lagugu dhoofinaayo.

Haddii aad tahay muwaadan Canadian ah, laguguma khasbi karo in aad Canada ka baxdid, in aad wax aan run ahayn ama warar aan dhammeeyn sheeg tahay markii aad codsaneysay muwaadannimada Canada ama deganaanshaha joogtada ah mooyee.

Maxaa dhacaya haddii uu jiro amar la iiga saarayo Canada?

Haddii uu jiro amar lid kugu ah oo laguugu eryayo:

- Waxaa dhici kara in khasab Canada lagaaga saaro waxaadna u baahan doonta ogolaansho khaas ah oo ay ku siiyan waaxda socdaalku si aad dib ugu soo noqotid.
- Waxaa dhici karta in xubnaha qooyaskaaga oo Canada wadaniyadeeda aan lahayn ay khasab ku noqoto in ay Canada isaga baxaan.

Maxaan sameeyaa si aan u badbaadiyo xaaladeyda oo aan Canada ku sii joogo?

Isla markaas ku dhaqaaq in aad heshid la-talin sharciyeed. Haddii uu jiro amar lid kugu ah ee lagugu eryaayo, waxaad racfaan u qaadan kartaa Guddoonka Socdaalka iyo Qaxootiga (Immigration and Refugee Board). Laakin waxaad haysataa wakhti xaddidan, sidaas awgeed si dhaqsi ah arrintaas ugu dhaqaaq.

Haddii maxkamadda dambiyadu go'aamiso inaad dambiile tahay, taas nafteeda xaq baad u yeelan kartaa in aad racfaan ka qaadata. Mar kale wakhti xaddidan baad haysata, sidaas daradeed isla goortaa doono la-talin sharciyeed.

↪ bogga 2aad warar kale ayaa ku qoran ↪



Waxaad cafis ka codsan kartaa Guddiga Qaranka ee Shardi ku-siideynta Maxaabista (National Parole Board) haddii aad dhammeysatay ciqaabtii ay maxkamaddu kugu xukuntay. Waxaa jira muddo la sugo inta aadan codsiga sameeyn. Haddii lagu cafiyo, waaxda socdaalku waa inay kuula dhaqmaan sidii adigoon wax dambi ah laguugu xukumin oo kale. ♦

Boggaan waxaan kuugu sheegeynaa warar guud ahaaneed oo keliya. Waa in aad raadsataa la-talin sharciyeed oo la xiriirta xaaladaada.

Sida kaalmo loo helo


Findhelp waa hey'ad beeleed oo dadka ku caawisa luqado badan. Waxey teleefoonka ka jawaabaan afar iyo labaatanka saac (24-ka saac), toddobada beri ee asbuuc walba.

Waxey kuu sheegi karaan:

- meesha aad cawinaad sharci ka heli kartid, iyo
- sida aad ula xiriiri kartid hey'ad dejineed ama hey'ad beeleed oo aad ka heli kartid caawinaad noocyo kale ah.

Findhelp kala xiriir:

 Lacag la'aan ah
(Toll-free) **1-866-667-5366**

 Lacag la'aan ah ee dadka
maqalka ka dhibaateysan
(Toll-free TTY) **1-888-340-1001**

 www.211ontario.ca

Caawinaado kale:

Waxaa soo diyaariyey CLEO (Community Legal Education Ontario/Éducation juridique communautaire Ontario) iyagoo ay kala shaqeyeen [CLEO Six Languages Advisory Group](#), oo ka kooban 10 hey'adood oo xubin ka ah.

Mashruucaan waxaa maalgaliyey Ontario Trillium Foundation iyo Legal Aid Ontario.

CLEO waxey Findhelp uga mahad celinaaysa caawinaada teleefoonka oo ay mushruucaan ka geeysteen.

Booqo www.cleo.on.ca si aad bogogaan iyo warar kale ugula soo baxdid.